**This is a transcript of Joanna discussing vaccines including MMRV. (Somali)**

Dr. Joanna Betterton. Waxaan ahay dhakhtar guud (GP) oo ka shaqeeya Rugta Caafimaadka ee Southmead iyo Henbury oo ku yaaal Bristol. Sidoo kale, waxaan xiiso gaar ah u qabaa caafimaadka carruurta, gaar ahaan tallaalka carruurnimada. Tallaalka MMRV waa tallaal la siiyo carruurta si looga caawiyo in looga ilaaliyo afar cudur. Kuwani waa jadeecada, qaamo qanshiirka, rubella, iyo busbuska.

Varicella waa fayras keena busbus. Waalidiinteena badankooda way maqleen busbuska ama laga yaabaa in carruurtoodu ay qaadday. Waa fayras keena finanan iyo calaamado u eg hargabka sida sanka oo dareera, qufac, iyo qandho.

Carruurta badankeeda ee qaada busbuska (ama varicella) waxay yeeshaan xanuun fudud, oo ah waxa aan u naqaanno mid iskii u istaaga, laakiin waxaa jira xaalado ay carruurtu aad ugu xanuunsan karaan, taas oo keenta in isbitaal la dhigo, tani waxayna ka imaan kartaa dhibaato dambe sida oof-wareenka, oo ah caabuq daran oo ku dhaca sambabada, ama encephalitis, oo ah caabuq ku dhaca maskaxda.

Haddaba, anagoo ah khubaro caafimaad, dhab ahaantii waan aragnaa xaaladahaas, taasi waxayna noqon kartaa mid aad looga walwalo, taas oo ah sabab aad u muhiim ah oo aan carruurta uga ilaalino busbuska. Waxaan u sheegayaa inay runtii muhiim u tahay dhammaan waalidiinta inay tixgeliyaan in ilmahooda la siiyo tallaalka MMRV. Sababtu waxay tahay, wuxuu ka ilaalinayaa cudurradan, ma aha oo kaliya inuu ilmahaaga ka badbaadiyo xanuunka iyo inuu ku xanuunsado iyaga dhexdiisa, laakiin sidoo kale dhibaatooyinka suurtagalka ah ee ka dhalan kara.

Haddaba, waan ognahay in jadeecada, qaamo qanshiirka, rubella, iyo busbuska ay dhamaantood la imaan karaan dhibaatooyinkan dambe, qaar ka mid ah cudurradanna waxay sidoo kale xiriir la yeelan karaan naafanimo, xitaa waxay noqon karaan kuwo dhimasho keena. Sidaa derteed waa mid runtii, runtii muhiim ah in carruurta laga ilaaliyo kuwan. Qodobka kale ee aan had iyo jeer xuso waa xaqiiqda ah in jadeecada aan ku aragno koror gudaha UK hadda, runtiina waxaan horey u lahaan jirnay heer ah inaan ciribtirnay gudaha UK iyo Ururka Caafimaadka Adduunka, laakiin taasi hadda waa nalaga qaatay, markaa waddan ahaan waxaan aragnaa xaaladahaas oo haddana kor u kacaya.

Jadeecadu waxay keeni kartaa caabuq daran oo maskaxda ah waxayna keeni kartaa naafanimo, sidoo kale waxay dhab ahaantii keeni kartaa xanuun dabA dheer ah xitaa hadhow nolosha, sannado ka dib markaad qaadday jadeecada, kaas oo ah xaalad neerfaha ah oo tartiib-tartiib u sii korodha oo dad badani aysan aqoon u lahayn. Markaa waa sababta ay runtii muhiim u tay in dadka la ilaaliyo marka ay yar yihiin.

Xitaa haddii ay qaadeen nooc fudud oo xanuunka ah, haddana waxay halis u yihiin inay xanuunsadaan hadhow nolosha sidoo kale. Anigoo ah xirfadle caafimaad,

fariinteyda ku socota adinka oo ah waalidiinta, daryeelayaasha, iyo hooyooyinka mustaqbalka waxay ahaan lahayd fadlan, fadlan tixgeli inaad tallaasho ilmahaaga. Tani waxay gacan ka geysan kartaa in laga ilaaliyo xanuun halis u noqon kara, dhab ahaantii waxayna xitaa badbaadin kartaa noloshooda.

Anagoo ah khubaro caafimaad, dhab ahaantii waxaan aragnaa xaaladdo aad u murugo badan oo ah carruur aan la tallaalin, marnaba, marnaba ma dooneyno inaan aragno taas marka xanuun la ka hortagi karo uu jiro.

Markaa fadlan tixgeli in lagu tallaalo. Waxa kaliya ee aan oran lahaa waa inay gabi ahaanba caadi tahay waalid ahaan inaad dareento walwal ama hubaal la'aan, haddii aad sidaas dareemaysana, fadlan kaliya kaalay oo la hadal qof.

Waalidna ma aha inuu marnaba dareemo in lagu xukumay go'aankooda ama walwalkooda, mar walbana waa inaad xor u tahay inaad la hadasho qof aad ku kalsoon tahay, kani wuxuu noqon karaa booqandahaaga caafimaadka, kalkaalisada rugtaada caafimaadka, ama dhakhtarkaaga guud, sidoo kale waxaa jira ilo internet oo dhab ahaantii aad u wanaagsan sida websaydhka NHS-ta iyo websaydhka dowladda, laakiin also waxaan si dhab ah u kugula talin lahaa Oxford Vaccine Knowledge Project, kaas oo aad si fudud uga raadin karto internetka.

Sidoo kale.wuxuu leeyahay muuqaalo iyo ilo aad u fiican oo loogu talagalay waalidiinta Aniga qudhaydu waxaan ahay hooyo mustaqbalka ah, sidaas darteed waxaan ka fahmayaa dhankaas waalid ahaan ee ma aha oo kaliya xirfadle caafimaad, inaad doonayso inaad sameeyso cilmi-baaris adiga kuu gaar ah oo aad go'aanadaas u gaarto ilmahaag, taasi waa wax aan anigu qudhaydu sameeyay sidoo kale.

Waxaan eegay cilmi-baarisyo badan oo ballaaran oo ku saabsan tallaalka MMRV, waxaanan arki karaa in loo isticmaalay sanado badan, iyo sanado badan waddammada kale, oo ay ku jiraan Australia iyo Ameerika, markaa waxaa jira xog badbaado oo aad u ballaaran oo ku saabsan. In kasta oo ay noqon karto mid walwal leh in la ngheero erey cusub, tani dhab ahaan waa tallaal socday sanado badan.

Markaa aniga iyo ninkaygu waxaan gaarnay go'aan ah inaan si buuxda u tallaalno cunugayaga marka uu dhasho, iyo waqtiyada ku habboon. Laakiin sidoo kale waxay ku saabsan tahay ilaalinta ma aha oo kaliya ilmahaaga laakiin qoyskaaga, hal shay oo runtii ii xaqiijiyey ayaa ah in walaashay ay gaartay go'aan ay si buuxda u tallaasho mataanaheeda.

Waxaan eedo u ahay gabadha iyo wiilka ay dhashay walaashay ee quruxda badan, waxaa aan ugu jacelahay anigu waa marka aan qabto ilmaha ii dhashada aniga marka koowaad., waxaan ogahay in inkastoo cunugaygu laga yaabo inuu aad u yar yahay si uu u qaato tallaalka MMRV, xaqiiqda ah in walaashay ay gaartay go'aankaas waxay ilaalinaysaa cunugayaga naftiisa sidoo kale..